

Xeerka 26 Jannaayo 1957, lamba. 9 rep.

Dhismaha Garyaqaanka Guud

MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. ee 1 Maamulaha loo wakiishay in uu abaabulo Xukuumadda Soomaaliya;

Marka uu arkay qod. 97 ee Amarka 2 Febberaayo 1956, lamba. 5 oo ku saabsan Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaaliya;

Marka uu garowsaday in ay habboontahay in loo dhiso Garyaqaanka Guud Xukuumada Soomaaliya;

Marka uu arkay sidoo kale habboonaanta nidaaminta qoraalada garsoorka in la gaarsiiyo Xukuumadda Soomaaliya;

La dhagaystay Golaha Wasiirada;

Soo jeedinta Wasiirka Koobaad;

WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

Qod. 1

Golaha Wasiirada waxaa laga dhisay Garyaqaanka Guud oo hawshiisu tahay in uu matalo, difaac iyo ka caawiyo garsooridda Xukuumadda Soomaaliya iyo Wakaaladaha Dawladda ee iyada hoos yimaada.

Qod. 2

Madaxa Garyaqaanka Guud waxaa qabanaya Qareen Dawlaeed oo Maamuluhu dekereeto ku soo magacaabo, marka Wasiirada Koobaad soo jeediyo, lana dhagaysto Golaha Wasiirada.

Qod. 3

Qareenku xilkiisa wuxuu ku gudanayaa dhammaan maxkamadah hortooda iyo xarun kasta isagoo aan u baahnayn wax wakaalada, xitaa mararka la iska doonayo wakaalad gaara, iyadoo ay ku filantahay keliye maqaamkiisa.

Qod. 4

Xigashooyinka, ashtakooyinka, xukunada iyo qoraal kasta ee maxkamadaha waa in la wargalinayaa Xukuumadda Soomaaliya ama Wakaaladaha Dawladda oo iyada hoos yimaada, Xaaafiiska Garyaqaanka Guud, kuwaaso la'aantiis ay wax kama jiraan yihiin.

Muqdisho, 26 Jannaayo 1957.

P. Maamulaha
P. Franca

Cabdullaahi Ciise Maxamuud

Lagu sugay lamba. 8 26 Jannaayo 1957

Madaxa Xisaabaadka: **Tura**

La sugay lana Diiwaangeliyay – Diw – lamba. 1 – bogga 35

Muqdisho, 29 Jannaayo 1957.

Hantidhowraha Guud: **Spadaro**